# Iswaafajinta Guusha Ardayga: Tilmaanta Isku Dhafan ee Lixda Hindise ee ODE
## Sharaxaadda Arjiga

Cilmibaadhista iyo qiimeyntu sidoo kale waxa ay caddeeyaan horumarka shaqaalahayaga. Anaga oo kaashanayna xog-ururinada tegitaanka, kooxaha diirad saaridda, iyo waraysiyada –

- Shuraakooyinka sinnaanta qowmiyadeed iyo cadaaladda bulsheed (RESJ) ee lagu taageerayo Ardayda aan Caddaanka ahayn
- Qareenada cadaaladda dhaqancelinta, kuwaas oo dhisa isla markaana xoojiya bulshada, oo dayactira dhaawaca, iyada oo qayb ka ah shaqadayada ah jihaynta anshax-marinta
- Waxbarashada xirfadeed, ee aanu ku dhamaystirayno kuna qoto dheeraynayno maalgelinadayada curaaraha iyo maalgelinta guud ee manhajyada aasaasiga ah iyo qaabka waxdhigista ee cusub
- Waxbarasho gaar ah, oo leh khibrado la kala duway oo la bedbeddeli karo taas oo kordhisa galaangal u helidda farshaxanka, hawlaha ku salaysan waxa ardaygu xiiseeyo, waxbarasho ardaygu is hagayo, iyo ka qaybqaadasho
- Barnaamij la xidhiidha mihnadda kaas oo xoojiya waxbarashada caalamka dhabta ah, oo camali ah
- Wanaajin joogto ah oo xog ku socota

Qorshaha maalgelinadani keliya waxa ay qayb ka tahay Qorshahayaga Istiraatiijiyadeed ee ballaadhan, ee degmada oo dhan ah. Labada qorshaba waxa ay si toos ah uga turjumaan qiyamkayaga iyo mudnaanahayaga aasaasiga ah. Sida lagu sheegay Qiimeynta Baahiyaha, PPS waxa ay dabagashaa oo ay kasoo warbixisaa horumarka Qorshaha Istiraatiijiyadeed saddexdii biloodba mar si loogu sameeyo dib u eegis gudeed, sanadkii halmarna waxa ay u warbixisaa Guddidayada iyo bulshadayada. Dayrtii 2022 kii, waxa aanu xaddidnay muujiyeyaal waxana aanu xog aasaasi ah ka ururinay natiijo istiraatiijiyadeed oo kasta, taas oo aanu sii wadi doono inaanu kormeerno inta aanu ka hawlgalayno yoolashayada. Waxa aanu sidoo kale bixin doonaa warbixino bartilmaameedsan, oo muddadiiba mar ah oo gaar ku ah qorshahan maalgelinta sida uu dhigayo Tilmaanta Isku-dhafan ee ODE.

## Sinnaanka Horumarsan

(250 eray ama wax ka yar su'aal kasta)

1. Waa maxay awoodaha aad ku aragto degmadaada ama dugsigaaga marka la eego sinnaanta iyo galaangal u helista?

Awoodda muhiimka ah ee aasaasiga ahi waa aqoonsigayaga kooxeed ee ah in degmadayadu u baahan tahay inay tirtirto gaababka waxbarasheed iyo fursadeed ee Ardaydayada aan Caddaanka ahayn. Dedaalkayagu waxa uu ka muuqdaa yoolkayaga, qorshahayaga, iyo shaqadayada. Waxa aanu adeegsanaa koobsasho dhamaystiran oo baltilmaameedsan si aanu u dejino yoolal guusha ardayga ah oo cad oo aanu u xaddidno istiraatiijiyado waxdhigiseed oo diiradda saaraya ardayda qoysaskoodu dakhliga hooseeyaan.

Waxa aanu sinnaanta qowmiyadeed ku soohnaa nidaamkayaga aasaasiga ah ee waxdhigiseed anaga oo adeegsanayna agab iyo manhajyo kobciya dareenka ka mid ahaanshaha, aqoonsiyada dhaqan, iyo guusha akaadeemiyadeed ee ardaydayada. Xarunta Sinnaana iyo U Dhannaanshuhu waxa ay u fududaysay horumar xirfadeed PPS, sinnaanta qowmiyadeed iyo caddaaladeedna waxa ay sees u noqdeen dhammaan horumarka xirfadeed. Waxa aanu dhisnay nidaamyo taageeraya arday walba – iyada oo daryeel gaar ah la siinayo ardayda kasoo jeeda qoysaska dakhliga hooseeya – muddooyin kala wareeg. Nidaamyadani waxa ay si gaar ah u taageeraan u wareegga xanaanada, iyo ka wareegitaanka fasalka siddeedaad ee loo wareegayo dugsiga sare. Taas marka laga yimaaddo, waxa aanu dhisnay shuraakooyin bulsho oo xooggan si aanu u dhaqaajino shaqadan.

Dugsiyada Dadweynaha Portland sidoo kale waxa ay diiradda saaraysaa nidaamyada iyo qaababka dhaqangelinta galaangal u helid loo siman yahay iyo dhaqano loo dhan yahay oo loogu talagalay ardayda naafada ah. Natiijada diirad saariddani waa in 80% kamid ah ardaydayada qaata waxbarashada gaarka ah ay ku qaataan 80+% wakhtigooda waxbarashada galaangal u helidda iyo ka qaybqaadashada waxdhigis aasaasi ah.

6. Waa maxay caqabadaha, halisaha iyo ikhtiyaarada la sameeyey ee saamayn kara suuragalnimada ardayda diirad saariddu inay buuxiyaan Bartilmaameedyada Korniinka Waxqabadka Dherereed ee aad qabyo qoraalka ku samaysay, ama sida kale u wajahaan taageerada ama isbeddelada aad rajaynayso qorshahaagu in uu keeno?

Qodobo dhawr ah ayaa saamayn kara guusha qorshahayaga. Waxa aanu ka dhex hawlgalnaa nidaam kaas oo, muddo jiilal ah, faquuqayey Ardayda aan Caddaanka ahayn, taas oo qayb ka noqonaysay gaababka joogtada

ay kormeeraan oo ay daba galaan xogta ardayga, waxa ay iskaashi la sameeyaan dhammaan waaxaha, waxana ay bixiyaan tilmaan joogto ah si ay u taageeraan guusha akaadeemiyadeed ee guud ee ardayda.

Kooxdayada McKinney-Vento sidoo kale waxa ay si joogto ah u dhisaan xidhiidho waxana ay xidhiidh joogto ah la yeeshaan shaqaalaha dugsiga. Bulshooyinka dugsigayaga ayaa si taxaddar leh u xaddida waxa ardayda shakhsiyaadka ahi u baahan yihiin si adeegyada iyo taageerooyinka looga dhigo kuwo shakhsiyeed. Dugsiyada waxa sidoo kale laga dalbadaa inay dhisaan dhaqano dugsiyeed oo togan, oo loo dhan yahay oo arday waliba ku dareemi karo in la taageerayo oo aan la faquuqayn.

DIIRAD SAARIDDA CTE

1. Waa maxay awoodaha aad ku aragto Barnaamijyadaada Daraasadda ee CTE marka la eego sinnaanta iyo galaangal u helidda?

Sagaalkii sano ee la soo dhaafay, daryeelka laxaadka leh ee la saaray waxbarashada mihnadeed iyo farsameed (CTE) waxa ay wax ka badan afar jeer laabtay tirada fursadaha waxbarashada ee diiradda saara mihnadda. Imika waxa aanu bixinaa wax ka badan siddeedyo-toddobaatan barnaamij oo ku daboolaya dhammaan dhabbooyinka manhaj ee labaatanka ah qaabka Kooxda Mihnadeed ee Qaranka "National Career Cluster". Barnaamijka CTE waxa laga heli karaa dugsi sare oo kasta, Cilmiga Kombuyuutarka, Baahinta Dijitaalka ah, Injineerinka, iyo Ganacsiga/Suuqgeyntana waxa laga heli karaa ku dhawaad dhammaan dugsiyada sare.

Waxa aanu ku han weynahay in barnaamijyadani caqabada hor taagan ka qaybqaadashadoodu ay aad u yar yihiin. PPS ma laha hannaan arji oo loogu talagalay ardayda danaynaya inay qaataan koorsooyinka CTE, mana jiraan wax shuruud ama caqabado ah oo dheeraad ah oo hor taagan isdiiwaangelinta.

Ka qaybqaadashadu sidoo kale waa ay soo wanaagsanaanaysaa dhammaan qaybaha dadweynaha. Imika ahaan, 68% kamid ah dhammaan ardayda dugsiga sare ayaa ka diiwaangashan koorso CTE ah. Shantii sano ee u dambeeyey, boqolleyda ardayda dhamaystiraya barnaamij CTE ah wax ka badan laba jeer baa ay laabantay. Marka la eegayo bulshooyinka la faquuqo gaar ahaan, korodhku keliya wax aad u yar baa uu ka yar yahay – balse xidhitaanka gaabka gebi ahaanba weli waa yool.

Ardayda CTE sidoo kale waxa ay ku qallinjebiyaan heerar sarreeya. 2021 kii, heerkayaga qallinjebinta ee guud waxa uu ahaa 84%. Ardayda ku dhamaystiray saddex sano barnaamij CTE ah dhexdooda, heerka qallinjebintu waxa uu ahaa 95%. Xattaa ardayda qaatay keliya hal koorso oo CTE ah waxa ay ka kor mareen heerka qallinjebinta ee guud, iyaga oo ku qallinjebiyey heer ah 93%.

2. Waa maxay baahiyaha lagu ogaaday Barnaamijyadaada Daraasadda ee CTE marka la eego sinnaanta iyo galaangal u helidda?

Degmadu waxa ay wanaajin kartaa sida aanu wax uga qaban karno baahiyaha kala duwan ee barteyaasha CTE ee kasoo jeeda qoysaska dakhliga hooseeya. Barteyaasha Waxbarashada Gaarka ah iyo Luuqadda Ingiriisida, tusaale ahaan, waxa ay u badan tahay inay u baahdaan taageero gaar ah si ay si buuxda uga qaybqaataan fasallada CTE. Waxa aanu horumarinaynaa tababar xirfadeed oo ah sida ugu wanaagsan ee loogu adeegi karo ardaydan CTE ga ah, qorshahayaga maalgelintuna waxa uu dardar gelin doonaa shaqadaas sinnaanta ee muhiimka ah.

Barnaamijyo gaar ah ayaa ku kooban dugsiyo sare oo gaar ah, oo sidaas darteedna ay galaangal u heli karaan ardayda xaadira dugsiyada gaarka ah. Illaa heer, barnaamijyadu sidoo kale waxa ay ku kooban yihiin aagga uu ku yaallo dugsigoodu: haddii aynu laba tusaale sheegno, dhammaan dugsiyadu ma wada awoodaan inay martigeliyaan barnaamijyada Martiqaadka/Dalxiiska. Baaxadda barnaamijka waxa sidoo kale xaddida

darajo-bixinta ee loo siman yahay, eexda ismooganaanta u dhacda, iyo abuuritaanka fasallo loo dhan yahay, oo ay la socdaan arrimo kale. Tan waxa aynu kaga wada hadalnay halka sare, maadaama oo ay si dhaw xidhiidh ula leedahay dhaqangelinta manhajyo cusub iyo qaabkayaga waxdhigista ee cusub.

Iskaashiga dhex mara barnaamijyada CTE, hay'adaha bulsheed, iyo kooxaha isku-soo-dhawaanta ee dugsigu

Waxa sidoo kale si qoto dheer nooga go'an wanaajinta laba luuqadood. Ku dhawaad kala badh kamid ah 81 kayaga dugsi ayaa hadda marti geliya barnaamij ah isdhexgelinta laba luuqadood oo ah mid kamid ah shan luuqadood: Fiitnaamiis, Raashiyaan, Jayniis, Isbaanish, iyo Jabaaniis. Sanad walba qallinjebiyeyaal PPS oo intii hore ka badan ayaa kasbada Shahaadada Wanaajinta Laba Luuqadood – ku dhawaad korodh saddex laab ah laga soo bilaabo 2019 kii.

2. Waa maxay takhasusyada farshaxanada (tiyaatarka, farshaxanada muuqaalka, muusigga, qoob-ka-ciyaarka, farshaxanka baahinta) ee la bixiyo, iyada oo lagu bixinayo isdhexgelin maaddo ama isaga oo ah fasal gaar ah?

Waxa aanu si qoto dheer u aaminsanahay in khibrad waxbarasho dhamaystirani aanay dhamays noqon iyada oo aan galaangal loo helin waxbarasho farashaxan oo tayo sarreeya. Taasi waxa ay ka dhigan tahay arday kastaa waxa uu galaangal u heli doonaa waxbarashada farshaxanka tallaabo kasta oo kamid ah safarkiisa K-12. Farshaxanku waxa uu awood u leeyahay oo suuragal u ah in uu ka caawiyo ardaydayada inay u eegaan caalamka qaabab cusub oo ay aqbalaan qaab-aragyadaas badan – sifooyinka sida tooska ah u waafaqaya himiladayada iyo qorshahayaga.

Dugsi hoose oo kasta waxa uu siiyaa arday kasta mid ama laba ah fasallo farshaxanka hodminta ah toddobaad walba oo ah shanyo-afartan daqiiqo fasalkiiba. Dhammaan dugsiyadayada, waxa noo jooga macallimiin tababaran oo ka bixinaya xaddi dhamaystiran oo takhasusyada farshaxanka ah fasalladan.

Dugsi sare oo dhamaystiran oo kasta waxa uu bixiyaa barnaamij farshaxan CTE, maqal iyo muuqaal, iyo xidhiidh ah. Barnaamijyadayada farshaxanka ee lixyo-labaatanka ah waxa ay daboolaan sawirka, muuqaalka, farsameynta codka, tiyaatarka, naqshadeynta wax soo saarka, iyo dhoobada. Ardayda ka qaybqaadanaysa waxa lagu dhiirrigeliyaa inay raacaan isku xigxigitaanka koorsada oo ay kamid yihiin heerarka hordhaca, dhexe, iyo sare. Dhammaan barnaamijyadayadu waxa ay leeyihiin waafaqsanaan dugsiga sare kadib ah oo ay la leeyihiin kulliyadaha bulshada ee deegaanka iyo shuraakooyinka shaqada. Ardayda dhamaystirta barnaamijyadu waxa ay fursad u helaan inay kasbadaan shahaadooyin shaqadu-aqoonsan tahay oo ay la socdaan in la tuso qalabka iyo khibradda shaqada.

3. Sidee baad u xaqiijisaan ardaydu inay galaangal u helaan barnaamijyo maktabadeed oo xooggan?

Dugsi hoose oo kasta waxa uu leeyahay maktabad uu ka shaqeeyo khabiir baahinta maktabadda ah oo shahaado haysta. Waxa aanu waajibinaa in dhammaan ardayda dugsiyada hoose ugu yaraan hal xiisad oo hodmin ah ay ka qaataan khabiirka toddobaad walba. Booqashooyinka maktabaddu waxa diiradda lagu saari karaa ka qaybqaadashooyinka akhriska, ama casharro lagu wado Heerarka Maktabadaha Dugsiyada ee Oregon. Khubarada waxa sidoo kale lagu tababaray manhajkayaga Farshaxanka Luuqadda Ingiriisida si ay u kabaan oo u taageeraan mawduucyada aqoon-dhisidda ee ardaydu ku bartaan fasalladooda aasaasiga ah.

gacan ka geysteen fududaynta iskaashiga ka dhexeeya ardayda iyaga oo u ogolaanaya inay ka wada shaqeeyaan mashaariic wakhtiga dhabta ah, inay wadaagaan macluumaad, oo ay is weydaarsadaan fikrado. Tani waxa ay keentay fahan qoto dheer inay u yeeshaan aragtiyaha STEAM waxana ay dardargelisay qaab fekerka naqdinta leh iyo xirfadaha xallinta mashaakilka.

Xisaabtu waa mid ku salaysan dhibaato oo ku dhisan mabda'a ah in dhammaan ardaydu ay baran karaan STEAM. Ardaydu waxa ay ku dhisaan fahankooda hadda ee xisaabta, khibradahooga nololeed, iyo dunida ku xeeran khayraad ahaan inay u noqoto xallinta-mashaakilka. Nashaadaadka waxbarashada ee mashaakilka ku salaysan ee hodanka ah waxa ay ku casuumaan ardayda inay ku dhisaan dhinacyada fahankooda oo ay la wadaagaan aqoontooda iyo fahankooda dhammaan aagagga xiisadaha ardayda kale iyaga oo u maraya ruutiino waxdhigiseed oo loo naqshadeeyey si taxaddar leh. Ardaydu waxa ay u adeegsadaan qalabka 1:1 si ay ugu halabuuraan muuqaallo, podcasts, ama soo jeedino isdhexgal oo ay ku muujinayaan fahankooda aragtiyaha.

Dugsiyada qaar, waxa aanu ka bilaabaynaa hannaan dib u naqshadeyn jadwalka muhiimka ah kaas oo ogolaanaya galaangal u helid intii hore ka badan in loo yeesho ikhtiyaarada, oo ay kamid yihiin fursadaha STEAM. Taas waxa dheer, manhajkayaga aanu dhaqangelinay dhawaan waa camali waxana uu ku sahamiyaa dunida dhabta ah hannaanada qaab fekerka naqdinta leh iyo isweydiinta.

6. Sharrax hannaanka aad ku xaqiijinaysaan manhajka la dhaqangeliyey (aasaasi ama kab) oo ka kooban baaxad iyo isku xigxigitaan si cad loo sheegay oo ah ujeedooyinka waxbarasheed ee K-12 isla markaana waafaqsan dhammaan heerarka gobol iyo qaran.

Hannaankayaga dhaqangelinta manhajku waa mid adag oo loo dhan yahay, waxana uu waafaqsan yahay manhajyada la dhaqangeliyey ee ODE, himiladayada, iyo Qorshahayaga Istiraatiijiyadeed.

Hannaankayagu waxa uu ku bilaabmaa baaxad iyo isku xigxigitaan ku salaysan heerarka gobol iyo qaran. Dhammaan manhajyadayadu waa kuwo waafaqsan heerarka. Hoggaanada mawduucyada ee Xafiiska Maamulaha PPS waxa ay isku keenaan guddi dhaqangelin oo ka kooban macallimiin, masuullo dugsiga ah, iyo khubaro. Iyaga oo adeegsanaya dhaqannada ugu wanaagsan ee goobta, xubnaha guddigu waxa ay sameeyaan hage-qiimeyn si ay ugu qiimeeyaan agabyada waxdhigiseed. Hagahan-qiimeyn waxa uu yeelan karaa dhawr qaab, balse badanaaba waxa uu ka koobnaan doonaa heerar gobol iyo federaal, iyo shuruud sinnaan qowmiyadeed iyo ahmiyad dhaqan.

Waxa aanu ku dabbaqnaa hage-qiimeynteena manhajyada la dhaqangeliyey ee ODE waxana aanu sheegi doonaa ikhtiyaarada buuxinaya shuruudeena; kadibna liiskan waxa aanu barbardhigi doonaa EdReports si aanu u doorano manhajyada ugu qiimeynta sarreeya. Xaaladaha qaarkood, manhajyadu waxa dhici karta inaanay buuxin baahiyaha/heerarka PPS. Marka tani ay dhacdo, waxa aanu raadsanaa hannaan dhaqangelin oo madax bannaan oo ku salaysan hagitaanada ODE. Hannaankaas madaxa bannaan waxa uu adeegsan doonaa isla hagaha-qiimeynta si uu u xaqiijiyo is waafaqsanaanta heerarka iyo qiyamka. Ikhtiyaarada manhajyada ayaa dabadeed lasoo yareeyaa iyada oo lagu salaynayo hagaha-qiimeynta, dib u eegista agabka, iyo waraysiyada kadib ku tijaabinta goobta. Inta lagu gudo jiro ku tijaabinta goobta, ardayda, xubnaha bulshada, iyo qoysaska ayaa lagu casuumaa inay dib u eegaan oo ay ku qiimeeyaan agabka soo jeedino iyo munaasabo bulsheed.

Manhajyada kabka ah ayaa dib loo eegaa kadib marka aanu dhaqangelino manhajyada aasaasiga ah. Tani waxa ay xaqiijisaa in agabka kabka ahhi taageeraan manhajyada cusub. Agabka kabka ah ayaa dib lagu eegaa hannaan la mid ah ka lagu eegay agabka aasaasiga ah.

taageera macallimiintayada xannaanada samaynta habraacyo halabuur leh oo ay ku dhigayaan manhajyadayada heerarka ku salaysan ee adag iyaga oo adeegsanaya dhaqano korniin ahaan habboon.

9. Waa maxay istiraatiijiyadaha aad u adeegsataan gacan ka geysashada fududeynta kala wareegyada wax ku oolka ah ee lagaga wareegayo fasallada dhexe ee loogu wareegayo dugsiga sare iyo kuwa lagaga wareegayo dugsiga sare ee loogu wareegayo waxbarshada dugsiga sare kadib?

Sida ka muuqata Qiimayntayada iyo Qorshahayaga Baahiyaha, istiraatiijiyadahayaga kala wareegu waxa ay ahmiyadda siiyaan sinnaanta qowmiyadeed, waxana ay aqoonsadaan in kooxaha ardayda ee diirad saariddu ay u baahan yihiin taageero gaar ah inta ay u kala gudbayaan hal aag waxbarasho oo ay u gudbayaan ka xiga.

Waxa aanu siinaa ardayda fasalka sagaalaad galaysa barnaamij loo yaqaan "Bilaabitaanka Fasalka Sagaalaad - Leap into Ninth Grade." Barnaamijku waxa uu ardayda la kulmiyaa macallimiintooda iyo facooda cusub inta lagu gudo jiro xagaaga kahor inta aanay bilaabin dugsiga sare. Manhajku waxa uu u aqoonsadaa khibradaha nololeed, inay yihiin qaabab aqoon oo sax ah, aqbalaa qaabab badan oo garashada ah, oo ku dhiirrigeliyaa ardayda inay aqoonsadaan hannaanadooda waxbarashada ee gaarka ah. Qaybahani waxa ay ka turjumaan himilada bulshadayada ee qallinjebiyeyaashayada waxana ay quudiyaan dareenka ardaydayada ee kamid ahaanshaha, ammaanka, sugnaanta, isku-filnaanta, iyo is-xakameynta.

Marka ardaydu sidaas u bilaabaan sanadkooga fasalka sagaalaad, waxa loo qoondeeyaa Kooxaha Guusha Ardayga. Koox kastaaba waxa ay ka kooban tahay ugu yaraan saddex macallin oo takhasusyo badan kuwaas oo ka wada shaqeeya dib u eegista xogta ardayga, iyo xadidaadda taageerooyinka iyo istiraatiijiyadaha waxdhigiseed ee lagu wanaajinayo natiijooyinka ardayga.

Kala wareegyada ka dambeeya dugsiga sare, ardaydu waxa ay ku tiirsan yihiin isuduwayaasha mihnadeed, isuduwayaasha kuliyadeed, iyo la taliyeyaasha si ay u xaqiijiyaan inay la kulmaan fursado dugsiga sare kadib ah oo kala duwan. Isuduwayaasha mihnadeed waxa ay u bandhigaan ardayda ikhtiyaarada mihnadeed, iyaga oo iskaashiyo la samaynaya bulshada iyo ganacsiyada deegaanka ee ka caawinaya ardayda inay samaystaan qorshayaal dugsiga sare kadib ah. Isuduwayaasha kuliyadeed, la taliyeyaasha, iyo kooxdooda taageerada – oo ay kamid yihiin kormeerayaasha ASPIRE, kormeerayaasha Near Peer, iyo/ama shuraakooyinka bulsheed – waxa ay ka kaalmeeyaan ardayda kaalmada dhaqaale, arjiyada kuliyadda, iyo hawlaha kale ee la xidhiidha kuliyadda.

Waxa aanu sidoo kale kuliyadda Bulshada Portland kala shaqaynaa martigelinta barnaamij Bridge ah. Barnaamijkaasi waxa uu leeyahay laba yool: yareynta "ka baaqashada jaamacadda ee xagaaga - summer melt", iyo bilaabitaanka hannaanka arjiga kuliyadda ee ardayda fasalka labayo tobnaad ee soo socda.

10. Sidee baad u aqoonsataan oo aad u taageertaan baahiyaha akaadeemiyadeed iyo kuwa farsameed ee ardayda aan buuxineyn ama baro dhaafinaya heerarka gobolka iyo qaranka, iyo bartilmaameedyada Waxqabadka Perkins, gaar ahaan kuwa kooxaha ardayda diiradda la saarayo?

Sida lagu qodobeeyey Qiimeyntayada Baahiyaha, waxa aanu beegsanaa inaanu xidhno gaababka joogtada ah, ee aan la aqbali karin ee u dhexeeya Ardayda Caddaanka ah iyo Ardayda aan Caddaanka ahayn. Kooxdayada Cilmibaadhista iyo Qiimeyntu waxa ay kala shaqeeyaan macallimiintayada, shaqaalahayaga dugsiga, hoggaamiyeyaashayada dugsiga, iyo Xafiiskayaga Adeegyada Taageerada Ardayda inay si joogto ah dib ugu qiimeeyaan sida aanu u aqoonsano oo aanu u taageerno baahiyaha ardayda.

PPS waxa ay bixisaa nidaamyo taageero oo heerar badan (MTSS) iyo silsilad xidhiidhsan oo taageero waxdhigiseed ah. MTSS waxa ay diiradda saartaa ilmaha oo dhan, iyada oo taageeraysa waxbarashada akaadeemiyadeed iyada oo wax ka qabanaysa baahiyaha habdhaqan, bulsheed-shucuureed, iyo

xaadiritaanka. Waxa aanu xaddidnaa dhaqano waxdhigis, wax ka qabasho, iyo qiimeyn oo loo siman yahay, oo caddeyn ku salaysan si aanu u xaqiijino in arday kastaaba uu helo taageerada uu u baahan yahay. Si aanu yoolkaas u gaadhno, qiimeyntayada dhamayska tirani waxa ay ka kooban tahay baadhis caalami ah, qiimeyn baadhiseed, qiimeynta samaynta ee caamka ah, qiimeynta halbeeg, iyo tallaabooyinka gebagebada.

Qaabka MTSS gudihiisa, PPS waxa ay u qoondaysaa wakhti bulshooyinka waxbarashada xirfadeed. Kuwani waxa ay u kulmaan si joogto ah si ay isaga kaashadaan waxdhigista ku salaysan heerarka, qiimeynta caamka ah, horumarka waxbarashada, iyo falcelinta waxbarashada. Bulshooyinkan dhexdooda, waxa ay macallimiintu si iskaashi leh istiraatiijiyado ugu sameeyaan sida ugu wanaagsan ee ay u dabooli karaan baahiyaha ardayda.

11. Waa

1.

Waxa aanu sidoo kale ku hawlanahay inaanu kordhino isdiiwaangelinta ardayda kooxaha diirad saaridda. Kooxda U Diyaarsanaanta Kuliyadda & Mihnaddu waxa ay ka qabteen kulanno dhegaysi oo loogu talagalay qoysaska kooxaha diirad saaridda dhammaan degmada. Inta lagu gudo jiro kulannadan dhegaysiga, waxa aanu usoo bandhignaa qoysaska macluumaad ku saabsan deeqaha koorsooyinka - shaqada koorseed ee guud iyo barnaamijyada CTE labadaba. Waxa aanu sidoo kale wax ka weydiinaa baahiyahooga iyo doonisahooga gaarka ah ee barnaamijyada mustaqbalka. Waxa aanu ogaanay in ardayda iyo qoysasku aanay badanaaba ka warqabin nashaadaadyada, munaasabadaha, iyo fursadaha kale ee kuliyadda iyo mihnadda ee badan.

3. Sidee baad khibrado waxbarasho oo ku salaysan shaqo oo loo siman yahay u siinaysaan ardayda?

Qaabkan gudihiisa, waxa aanu aaminsanahay xirfaduhu inay ku horumari doonaan waxdhigis iyo waxbarasho tayo sare leh. Si aanu u xaqiijino taas, waxa aanu u abuurnay barnaamij la socosho macallimiintayada CTE ee cusub. Macallimiinta ka qaybqaadanayaa waxa ay faallooyin, ra'yi-celin, iyo taageero manhajeed ka helaan Macallimiinta Hawlaha Gaarka ah ee CTE.

Waxa aanu sidoo kale ardaydayada CTE ku waajibinaa heer dhamaystiran oo adag. Iyada oo qayb ka ah barnaamijyadooda CTE, ardayda waxa lagu qiimeeyaa xirfadahooga farsameed iyada oo lagu salaynayo heerar lagu xidhiidhiyey xirfado iyo aqoon heer-shaqo ah. Dugsi sare oo PPS oo kasta waxa uu bixiyaa fasallo labada saacadood ee waxbarasheed ah halkaas oo ardaydu isku mar kaga kasban karaan saacadaha waxbarasheed ee dugsiga sare iyo kuwa kuliyadda. Koorsooyinka labada saacadood waxbarasheed waxa kamid ah Sayniska Caafimaadka, Multimedia ha, Cilmiga Kombuyuutarka, Tiknoolajiyadda Adeegga Baabuurta, Nidaamyada Barnaamijyada Kombuyuutarrada, Laxaamadda, Tiknoolajiyadda Dhisidda Dhismayaasha iyo kuwo kale oo dheeraad ah. Ardayda ku jirta koorsooyinkan waxa loo tixgeliyaa arday kulliyadeed sidaas darteedna waxa ay awood u leeyihiin inay adeegsadaan khayraadka iyo taageerooyinka ay bixiso kuliyaddu.

5. Waa maxay nashaadaadyada aad siin doontaan ardayda ee keeni doona inay isku-filnaansho ka gaadhaan mihnadaha la xaddiday?

Waxa aanu aqoonsanahay in dadka ugu habboon inay xukumaan sida ardaydayadu ku noqon karaan kuwo isku-filan ay yihiin kuwaas hore uga shaqaynayey shaqada. Sababtaas awgeed, waxa aanu dedejinay galaangal ugu helidda Shahaadooyinka Ay Aqoonsan Yihiin Shaqooyinku (IRCs) barnaamijyadayada CTE. IRCs waxa laga soo xigtay khubaro dhab ah waxana ay u sahlaan ardayda inay muujiyaan in ay leeyihiin [S)4(ab)4(a1o39 TmRCs )]TJE

[redacted]

Barnaamijka Hagitaanka Biyo-gelinta, Hawada, Nijaarnimada, Korontada, tusaale ahaan, waxa waxdhigista ku jira dumar iyo dadka laga tirada badan yahay iyaga oo macallimiin ah.

Waxa aanu daraasaynaa, oo aanu si joogto ahna u daraasayn doonaa, si aanu u aragno in aanu wax ka beddelayno isku dheellitiranka jinsiyeed ee goobaha bartilmaameedsan. Sanadadii u dambeeyey waxa aanu aragnay korodh laxaad leh oo ku yimid ka qaybqaadashada haweenka ee Barnaamijyada Daraasadda ee Cilmiga Kombuyuutarka iyo Injineerinka.

7. Sharrax wax Barnaamijyada Daraasadda CTE ah oo cusub oo ay tahay in la sameeyo.

Fadliga cabbiraadda curaarta dugsigayaga awgeed, waxa aanu awood u yeelanay inaanu gaadhsiino – oo aanu saadaalino inaanu gaadhsiino – baraamijyada dugsiyo la casriyeeyey dhawaan. Casriyeynta Dugsiga Sare ee Grant waxa ay ka dhigan tahay in uu qaadi karo arday ka badan intii hore, ardayda inta badanina waxa ay dooneen in lasoo kordhiyo barnaamij Cunto-karin oo cusub. Goobaha iyo qalabka maqal/muuqaal ee cusub waxa ay awood ino

B

ahmiyadda siinaysa sinnaanta qowmiyadeed - si dugsiyadayada ay sidoo kale u hoggaamiyaan dad ka turjumaya bulshooyinkayaga.

5. Haddii aad kafaale qaaddo dugsi madax bannaan oo dadweyne, waxa aad ka qaybqaadashadooda ku sharraxdaa qorshaynta iyo sameynta qorshahaaga.

Waxa jira afar dugsi oo madax bannaan oo degmadu kafaale-qaaddo iyo laba gobolku kafaale-qaado oo ku jira arjiga degmada. Dugsi madax bannaan oo degmadu kafaale-qaaddo oo shanaad, Kairos PDX, oo loo doortay in uu si madax bannaan u codsado maalgelinada Xeerka Maalgelinta Ardayga (SIA).

Lixda dugsi ee madaxa bannaan ee ku jira arjigan waxa qayb ahaan maamusha degmada. Tani waxa ay ka dhigan tahay in degmadu ay gudbiso maalgelinada SIA oo ay bixiso kormeer dhaqaale iyo la socod oo ballaadhan, balse dugsi kasta oo madax bannan waxa uu leeyahay qorshihiisa iyo miisaaniyaddiisa SIA ee gaarka ah. Hawlaha SIA ee dugsiyadani waxa ay waafaqsan yihiin natiijooyinka iyo istiraatiijiyadaha aad ku arki doonto arjigayaga. Halka ay ku habboon tahay, PPS waxa ay si firfircoon uga qaybgelisaa dhammaan hoggaamiyeyaasha dugsiyada madaxa bannaan – degmadu ay kafaale-qaado ama gobolku uu kafaale-qaado – si ay u maamulaan maalgelinada SIA, oo ay kamid yihiin isuduwidda miisaaniyadaha iyo iswaafajinta istiraatiijiyadaha.

Afarta dugsi ee madaxa bannaan ee degmadu kafaale-qaaddo waxa ay sidoo kale ka qaybgeliyeen bulshooyinka dugsiyadooda inay warbixin kusoo kordhiyaan qorshayaashooda SIA. Dugsiga Tuulada Portland waxa uu xog-ururin ka qaaday qoysaska iyo shaqaalaha si ay warbixin ugu kordhiyaan maalgelinada SIA. Xog-ururinta waxa lagu diray iimeyl ahaan iyo waraaqdooda warbixineed. Le Monde waxa ay ra'yi-celin ku heshay xog-ururin, doodo diiradda la saaray, iyo intii lagu gudo jirey kulanada guddida ee dadweynaha u furan. Akaadeemiyadda Arthur ee Portland waxa ay ku heshay ra'yi-celin xog-ururin, habeenada dhegaysiga qoysaska, iyo wicitaano taleefan oo si toos ah loogu diro qoysaska. Gebagebadiina, Dugsiga Emerson waxa uu ra'yi-celin ku helay xog-ururin, kulanno bulsheed, iimayl ahaan, iyo intii lagu gudo jirey kulannada guddida, macallimiinta, iyio shaqaalaha.

6. Yaa laga qaybgeliyey dhinac kamid ah dhinacyada hannaanadayada qorshaynta sida ay dhigayso tilmaantani?
(Calaamadi dhammaan inta habboon)



ho6.

Mutadawiciinta dugsiga (xubnaha guddida dugsiga, xubnaha guddida miisaaniyadda, xubnaha PTA/PTO, xubnaha naadiyada xoojinta, xubnaha kooxaha la talinta waalidka, mutadawiciinta fasallada, iwm.)
Bulshada ganacsi
Shabakadaha Macallimiinta ee Gobol (RENs)
Dhiimanka iyo Macallimiinta Kuliyadda Bulshada ee Maxalliga ah; Dhiimanka iyo macallimiinta jaamacadda maxalliga ah
Isuduwayaasha Waxbarashada iyo McKinney-Vento ee Qaxootiga ah
Horumarinta Shaqaalaha iyo / ama Kooxaha Ganacsiga ee Maxalliga ah
Isuduwayaasha Gobol ee CTE
STEM ka / Xarumaha waxbarashada Hore ee Gobol
Shaqaalaha Adeegga u Qalmitaanka Mihnadeed iyo wixii ka horreeya Shaqada
Dhallinyarta Ku Lugta Leh Cadaaladda
Hoggaamiyeyaasha bulsheed
Wax kale _______________

7. Sidee looga qaybgeliyey?
   (Calaamadi dhammaan inta habboon)

Xog-ururin(ada) ama arjiyada ka qaybqaadashada ee kale (sida Feker Isweydaarsiga)
Kulan(ada) fool ka foolka ah
Koox(aha) diirad saaridda
Doodda nidaamsan
Kulanka kooxda bulshada
Kulan(ada) naqshada ama istiraatiijiyadda iskaashiyeed
Qorshayn iyo hindise(yaal) bulshadu waddo
Websayt
Kulanka Midawyada CTE
Farriimaha iimeylka
Waraaqaha warbixinta
Baraha bulshada
Kulanka guddida dugsiga
Kaashiga midawyada
Kaashiga shuraakooyinka bulsheed
Kaashiga hay'adaha diimeed
Kaashiga ganacsi
Wax kale _______________

Caddeynta Ka Qaybqaadashada

Waxa lagaa dalban doonaa inaad dirto shantaada agab ee ugu sarreeya ee ka qaybqaadashada. Degmooyinka yaryar, sida lagu sheegay halka sare, waxa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan labadooda agab ee ugu sarreeya.

1. Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee PPS ee Horusocod Wadajir ah Hannaanka Ka Qaybqaadashada Bulsheed (bogagga 10-11)
2. Wacyigelinta Shuraakada RESJ ee Dhaqangelinta Qaabka Waxdhigiseed
3. Qoraal Kooban oo ku saabsan Ka Qaybqaadashada Bulshada ee Maalgelinada PPS
4. Guudmarka Xog-ururinta Dugsiyada Guulaysta
5. Kulanka Dhegaysiga Qoysaska ee Guusha Dugsiga Sare iyo CTE ga

1. Waa maxay sababta aad ugu doorateen in agabyadan gaarka ah loogu diro arjiyadiina? Sidee baa

1.

kuurgalaya isla markaana bixinaya ra'yi-celin, taas oo warbixin

4. Sidee baad koboca iyo horumarinta xirfadeed u waafajisaan awoodaha iyo baahiyaha dugsiga, macallimiinta, iyo hogaamiyeyaasha degmeed?

Waxbarashada xirfadeed waa wareeg horumarin oo joogto ah oo ku salaysan xog. Dugsiyada, hoggaamiyeyaasha degmada, iyo waxbarasha

Hagaha 5Ps + C waa qaab loogu talagalay wadasheekaysiga waraysiyeed ee ka dambeeya u kuurgalka halkaas oo kormeeruhu uu kula wadaagi doono ra'yi-celin: Ammaan, Hubin, Tallaabo Ficil Mudnaan Leh, Samayn/Qorshayn, iyo Gunaanad. Inta lagu gudo jiro qaybta falanqaynta iyo ka fekeridda, macallimiintu waxa ay falanqeeyaan xogta waxbarashada ardayda si ay u xaddidaan tallaabooyin waxdhigiseed oo mustaqbalka ah. Wareeggan waxa uu socdaa sanadka oo dhan si loo horumariyo waxdhigista iyo waxbarashada.

Hoggaamiyeyaasha xafiiska maamulaha, tababareyaasha waxdhigiseed, iyo masuullada dugsigu waxa ay waxbarasho xirfadeed oo joogto ah ku qaataan Qaabka Tababarka Dhamayska Tiran sanad dugsiyeedka oo dhan.

6. Waa kuwee nidaamyada idiin diyaarsan ee aad kula soconaysaan natiijooyinka ardayga isla